



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

Ujeeddo: Baahin Shaqo Banaan

Nooca Shaqada: Xeer-Ilaaliye

Goobta Shaqada: Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

Tirada Shaqooyinka Banaan: 20 Xeer-Ilaaliye

Taariikhda Qabashada codsiyadu bilaabmayaan: 09/08/2023

Taariikhda qabashada codsiyadu xidhmayaan: 19/08/2023

Hordhac:

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka (XIGQ), waa Xafiis xubin ka ah Hay'adda Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, u madaxbanaan shaqooyinkiisa, muhiimna u ah dawladnimada, dabaqidda Xeerarka iyo Shuruucda Dalka iyo sarreynta sharciga. Waa Xafiis adeeg lagama maarmaan ah siiya shacabka Soomaaliyeed. Waxaa waajibaadkiisa iyo Masuuliyadihiisa ka mid ah:

- Dhowrista u feejignaanta sharciga iyo difaacidda xuquuqda Hay'adaha Dowladda.
- Ladagaalanka, dhaqaajinta iyo Dacwo-oogista denbiyadda ciqaabta ah.
- Hagista baarista dacwadaha ciqaabta ah ee Dalka iyo maxkamadayntooda.
- Ilaalinta iyo dhowridda Xuquuqaha kala duwan ee mawaadiniinta Soomaaliyeed.
- Xaqijinta sarreynta sharciga iyo ku dhaqanka Xeerarka Dalka iyo fulinta go'aamada sharci ee ka soo baxa Hay'adaha Dawladeed ee kala duwan.
- Kormeeridda xaaladdaha nololeed iyo ilaalinta xuquuqda dastuuriga ah ee maxaabiistu leeyihiin.
- Dhaqaajinta dacwadaha madaniga ah danta guud owgeed.
- Racfaan ka qaadashadda xukunadda iyo go'aanadda kale ee ka soo baxa maxkamadaha.



- Samaynta cilmi baadhisyo la xidhiidha dacwadaha horyaala Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo sharciyada uu dabaqayo.
- Iyo u doodista xuquuqda agoonta, dadka nugul iyo Ilaalinta Danta Guud ee cadaaladda.

Haddaba, si uu Xafiisku u guto waajibaadkiisa balaaran, una Xaqijiyo waajibaadkiisa sare ku xusan, waxaa baahi loo qabaa in la qaato xubno Xeer Ilaaliyayaal cusub oo ka qaybqaata taabbagalinta hawlaha loo igmaday Xafiiska. Habqaadashadan waa mid dhexdhexaad ah, hufan, daahfuran, oo cadaalad ku dhisansan.

Shuruudaha qofka Xeer Ilaaliyaha loo qaadanayo:

1. Waa in uu yahay/tahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhimirkiisu dhan yahay, aan gelin denbi maxkamadi ku xukuntey, da'diisuna aysan ka yareyn 30 sanno.
2. Waa in uu ka heysto/haysato Jaamacadad la aqoonsan yahay, ugu yaraan shahaadada heerka koowaad dhanka sharci ga ah.
3. Waa in uu faham fiican ka haysto/haysato shareecada islaamka, dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka u yaalla, gaar ahaan xeerarka kala duwan ee ciqaabta.
4. Waa in uu leeyahay/leedahay ugu yaraan labo sanno oo waayo-aragnimo ku shaqynta sharciga ah.
5. Waa in uu leeyahay/leedahay anshax suubban iyo sumcad wanaagsan bulshada dhexdeeda;
6. Waa in uu Aqoon fiican u leeyahay/leedahay adeegsiga aaladda computerka.
7. Waa in uu leeyahay/leedahay xirfad sare ee xallinta khilaafaadka.
8. Waa in uu qori karo kuna hadli karo luuqadaha (Af-soomaali, Carabi ama Ingiriisi)

Sida loo soo codsanayo shaqadan:

- Qofka danaynaaya shaqadan waxa uu ku soo diri karaa codsiyigiisa shaqo, macluumaadka taariikh nololeedkiisa [CV], nuql kamid ah shahaadooyinkiisa jaamacadeed iyo Sawir teesaro nooca baasaboorka, E-mail kan: hr@ago.gov.so
- Qabashada Codsiyada shaqo waxa ay xidhmaysaa **19/08/2023**, saacadu markay tahay **12:00 PM** (Habeenimo).



Somalia, Mogadishu, Hamar Weyne District, London Road ago.gov.so info@ago.gov.so



+252 617747770



4949



P.O.BOX 86